



Xafiiska Mas'uulinimada 2010-2011

Adeegyada Umeerinta Bilaashka ah Adeegyada Taageerka Waxbarashada (SES)

ARJIGA CODSIGA RASMIGA AH

Sidaad ugu Doorto Hay'ad Umeerin Ilmahaaga

FADLAN DEGDEG U FUR

Waqtiga Ugudambaynta: JIMCAHA, OKTOOBAR 8, 2010

Gacaliye Waalidka/Koriyaha:

Dugsiga ilmahaaga — iyo dugsii kasta ee Dugsiyada Dadweynaha Boston — wuxu heegan u yahay hanasho heer sare ah ee ardayda idil. Himiladayada kowaad waa fidinta taageerka lama huraanka ah si loo xaqiijiyo in arday kastaaba helo fursado fara badan siduu u wanaajiyo xirfadihiisa ama xirfadaheeda tacliimeed.

Anagoo himiladaas madaxa ku hayna, waxan gacanta kuugu soo fidinaynaa inaan ku ogaysiino in laga yaabo ilmahaaga inuu u qalmo caawinaad tacliimeed oo dheeraad ah xaga sharciga fedraaliga ee waxbarashada ee la dhaho ILMANA DIB LOOGAMA TEGAYO (NO CHILD LEFT BEHIND-NCLB).

Waxan rajaynaynaa in ardayda u qalanta oo idil iyo qoysaskooduba ka faa'iidaystaan fursadan waxbarasho.

Caruurta idil ee dugsiga ilmahaaga ee u qalma cunto bilaash ah ama qiimo jaban waxay u qalmaan inay helaan Umeerin Bilaash ah. Umeerintu waa caawinaad tacliimeed oo la bixin karo dugsii kahor, dugsii kadib, ama xiliga kulaylaha. Caawinaadan waxa bixiya fidiyeyaal gobolku ansixiyey.

Waxan ku siinaynaa ogeysiiskan si laguugu caawiyo inaad faahamto sida umeeriyeyaal ku ay u caawin karaan ilmahaaga iyo waxa lagaa rabo inaad samayso sidaad uga faa'iido adeegyadan. Maaha qasab inaad ilmahaaga ku qorto barnaamijka umeerinta bilaashka ah, laakin waxan aad kuugu dhiiri gelinaynaa inaad ka faa'iidaydano fursadan.

Xaga Umeerinta Bilaashka ah, Adigu Waa Inaad Doorataa!

Waxad karaysaa inaad kala doorato adeegyo umeerineed oo kala duwan ay fidiyeyaal ku bixiyaan meelo kala duwaan. Sidaas waxad talo ku go'aansaysaa inaad ilmahaaga waxa ugu fiican u heshid.

Waxan kuu baryaynaa sanad dugsiyeed wanaagsan.

Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud

Fadlan buuxi oo ku soo celi arjiga diiwaangelinta dugsiga ilmahaaga ilaa
Jimcaha, Oktoobar 8, 2010.

FIDIYEYAAALKA ADEEGA UMEERINTA	QEYBAHA BARNAMIJKA	FASALADA LOO ADDEGAY	RUGTA UMEERINTA	AFAFKA QALAAD EE LOO ADEEGAY
ACHIEVE HIGH POINTS, INC. Xiriirka: Darcy Asher, Devina Singh Phone: 1-877-737-6252	Xisaab	3-12	U-Meerin "on-line" ah	Isbaanish
ACHIEVE TUTORING Xiriirka: John Kurpis Teleefan: 617-818-7284	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Guri, & 47 Winter Street, Boston, MA	Isbaanish, Boortaqiis
ALLIANCE FOR INCLUSION AND PREVENTION Xiriirka: Robert Kilkeny, Meg Smith Telefan: 617-469-0074	Akhris, Qorid, Xisaab	6, 7, 8	Irving Middle School, Frederick Pilot Middle School	Waxba Hada
AMERICAS SCORES (New England) Xiriirka: Richard Sheward Telefan: 617-635-0066 xt. 159	Akhris, Qorid	3,4,5	Dugsiga Ardayga	Waco wixi tafaasiil ah
ANN'S CHRISTIAN LEARNING CENTER Xiriirka: Denise Jeter Telefan: 617-287-2332	Akhris, Qorid, Xisaab	K-8	Ganacsi, Dugsi, Xarun Bulsho, Rug Cibaado	Waco wixi tafaasiil ah
BELL-BUILDING EDUCATED LEADERS FOR LIFE Xiriirka: Pam Alden Telefan: 617-282-1567, xt.134	Akhris, Qorid, Xisaab	K2-5	Dugsiyada Holland, Kenny, Mather, Mattahunt, Jobn, Trotter	Waco wixi tafaasiil ah
BOSTON LEARNING CENTER Xiriirka: Peter Terry Telefan: 617-265-7170 xt. 302	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	235 Ashmont Street, Dorchester, MA 02124, Guriga Ardayga,	Isbaanish, Hayshiyani Kiriyol, Kebfeerdi Kiriyol, Kantoniis, Mandarin
BOSTON PUBLIC SCHOOLS Xiriirka: Maureen Harris Telefan: 617-635-9414	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsiga Ardayga	Fiyatnamiis, Hayshiyani Kiriyol, Isbaanish, Kebfeerdi Kiriyol, Shine, Bortuqiis, Somaali
BRAINFUSE ONE TO ONE TUTORING Xiriirka: Alex Sztuden Telefan: 866-272-4638	Akhris, Qorid, Xisaab	3-12	Umeerin Internet	Isbaanish
C&M EDUCATIONAL CONNECTIONS AND CONSULTING Xiriirka: Paula Nelson Telefan: 617-282-9700	Akhris, Qorid, Xisaab	K-10	Dugsiga, Ganacsi, Guri, Internet	Kebfeerdi, Shine, Hayshiyani Kiriyol, Bortuqiis, Isbaanish, Somaali, Fiyatnamiis
CATAPULT LEARNING Xiriirka: Katie Santos Telefan: 401-316-7921	Akhris, Xisaab	K-8	Dugsiga Ardayga	Afafka Idil
CITIZEN SCHOOLS Xiriirka: Aimee Demora Telefan: 617-695-2300	Qorid, Xisaab	5-8	Edison Middle School, Edwards Middle School, Gavin Middle School,	Waco wixi tafaasiil ah
CLUB Z IN HOME TUTORING SERVICES Xiriirka: Stephanie Mitchell Telefan: 888-434-2582	Akhris, Xisaab	K-12	Dugsi, Guri, Internet, meel kale	Isbaanish iyo kuwa kale oo codsi ku xiran
EDUCATE ONLINE Xiriirka: Fern Holland Telefan: 843-798-0180	Akhris, Xisaab	3-12	Dugsi, Guri, Internet, meel kale	Waco wixi tafaasiil ah
GENERATIONS INCORPORATED Xiriirka: Julie Sittler Telefan: 617-423-5545	Akhris	K-4	Dugsi, Xarumada Bulshada, Naadiyada Willasha &	Waco wixi tafaasiil ah
GREENWOOD SHALOM OUTREACH COMMUNITY, INC. Xiriirka: Tanna Preston Telefan: 617-282-1464	Akhris, Qorid, Xisaab	K-10	Washington Street, Dorchester, MA 02124	Isbaanish, Hayshiyani Kiriyol
LEARN-IT SYSTEMS Xiriirka: Deborah Picard Telefan: 617-822-0028	Akhris, Xisaab	K-8	Dugsi, Rugaha Bulsho	Isbaanish, Inciriisi, Hayshiyani Kiriyol
PINNACLE LEARNING CENTER Xiriirka: Steven Shapiro Telefan: 781-828-2800	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsi, Rug Cibaado, Xarun Bulsho, meel kale	Isbaanish, Shine, Bortuqiis, Faransiis, Kiriyol, Jabaniiis,
PREFERED TUTORING SERVICES Xiriirka: Denise Watson Telefan: 973-337-2111	Akhris, Qorid, Xisaab	K-8	Dugsiga Ardayga	Isbaanish, Boortaqiis, Turki
SMARTIES TUTORING SERVICES Xiriirka: Isaac Aronson Telefan: 617-861-8318	Akhris, Qorid, Xisaab	K-8	Dugsi, Rug Cibaado, Xarun Bulsho, meel kale	Isbaanish
SYLVAN LEARNING CENTER Xiriirka: Erica Adametz Telefan: 617-264-4150	Akhris, Xisaab	K-12	1626 Beacon Street, Brookline	U-wac faahfaahin
TENACITY, INC. Xiriirka: Gary Phillips Telefan: 617-562-0900	Akhris	6,7,8	Jackson warii, Edison, Washington Irving, Lilla G. Frederick,	Isbaanish
THE ACHIEVEMENT ACADEMY Xiriirka: Theodore Darlington Telefan: 1-866-808-2036	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsi, Xarun Kumuyuunati, Meel kale	U-wac faahfaahin
THE YMCA OF GREATER BOSTON Xiriirka: Joanne Russo Telefan: 617-927-8250	Akhris, Qorid, Xisaab	K-5	Dugsi, Roxbury YMCA, Dorchester YMCA, Huntington	Waco wixi tafaasiil ah

BAAHYAHA GAARKA EE LOO ADEEGAY	SAACADAHA UMEERINTA WIIGIIBA	SAACADAHA UMEERINTA SANADIIBA	MAALMAHA HAWLGALKA	HANAANKA UMEERINTA
U-wac faahfaahin	4 saac	30-35 saac	Isniin-Axad	Laba qof oo "on-line" ku xiriiraya
Dyslexia, Autism	2 saac	29 saac	Isniin-Sabti	Fool-ka-fool/Koox yar
Naafonimo waxbarasho iyo dareenba	4 saac	46 saac	Isn-sab	Koox
Waco wixi tafaasiil ah	3 saac	60 saac	Isn-Jim	Koox
Naafaonimo sahlan iyo mid dhexe ee waxbarashada	2-3 saac	31saac-Qofkii/ 41saac-Kooxdii	Isn-sab	Fool-ka-fool/Koox
Waco wixi tafaasiil ah	8 saac	51 saac	Isn-Jim	Koox
Naafaonimo sahlan iyo mid dhexe ee waxbarashada	2-3 saac	40saac	Waco wixi tafaasiil ah	Fool-ka-fool/Koox
Baahiyaha gaarka ah oo idil waa loo adeegaa	4 saac	60 saac	Isn-Kham	Koox
Waco wixi tafaasiil ah	2-3 saac	40 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool Internet
Baahiyaha gaarka ah oo idil waa loo adeegaa	2-4 saac	37 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool/Koox
Waco wixi tafaasiil ah	4 saac	35 saac	Isn-Kham	Koox
Waco wixi tafaasiil ah	10-12 saac	72 saac	Isn-Kham	Koox
Autism, Laxiriir Daahsan, Horumar Daahsan, Waxgarad, Dareenka, Neerfeyaalka, Shucuurta iyo waxyaabo kale oo codsi ku xiran	2-4 saac	40 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool/Koox
Waco wixi tafaasiil ah	2-4 saac	36 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool Internet
Waxba hada	2-4 saac	40 saac	Isn-Kham	Fool-ka-fool
Naafonimada ADD, ADHD, Asperger's iyo naafonimada hadalka	2-4 saac	77 saac	Isn-Kham	Fool ka-fool/Koox
Naafonimada ADD, ADHD	3 saac	45 saac	Isn-Sab	Koox
Naafonimada ADD, ADHD, Asperger's, Naafonimada waxbarashada hadaaqa, Xusuus la'aanta waqti qaaban	3-5 saac	38 saac Fool-ka-fool/ 66 saac Koox yar	Isn-Axad	Fool-ka-fool/ Koox
ADD, Dyslexia, ADHD,	4.5 saac	45 saac	Isniin -Jimce	Fool-ka-fool/ Koox yar
ADD, ADHD, Asperger's, Visually impaired	3-6 saac	60 saac	Isniin-Sabti	Koox yar
U-wac faahfaahin	2-6 saac	25 saac	Isniin-Sabti	Koox yar/ fool ka fool
Waco wixi tafaasiil ah	4-5 saac	60 saac	Isn-Kham	Koox
U-wac faahfaahin	2-6 saac	40+ saac	Isniin-Sabti	Koox yar/ fool ka fool
Waco wixi tafaasiil ah	2-6 saac	40+ saac	Isn-Jim	Koox

ACHIEVE HIGH POINTS, INC.

Waa barnaamij meerin XISAAB ah oo loogu tala galay fasalada 3-12 oo lagu habeeyey “standards”ka Dawladda Massachusetts. Achieve HighPoints waxay ardayda ka caawiisa inay gaaraan heer aqooneed oo la mid ah fasalkooda iyo inay keenaan dhibco sare imtixaanka dawladda. Iyadoo laga heli karo guriga 7 cisho wiiggii oo la isticmaalayo Kombuyuutar “laptop” BILAASH ah oo loo bixiyeey isticmaalka barnaamijka, ayaa qalabkaasi ardayda siinayaa debecsanaanta inay wax-bartaan xilliga ay doonaan. Iyaga oo la dagaalamin cimilada iyo taraafigga magaalada Boston. Ardaydu waxay qabsadaan hawshooda marka ay haleelaan si ay u dhammeeyaan 3-4 saacadood ee meerinta ah ee laga rabo wiiggii. Rikoorka raadraaca ee la xaqiijiyey: 82.5% ee ardayda dhameysatay barnaamijka waxay kor-u-kaceen darajada xisaabta ee dugsiga ay ka heleen. (II: Daraasad ay sameysay Jaamacadda Georgia sannadkii 2009). Waxaad dhammeysataa barnaamijka 30-35 saacadood ah oo waxaad aragtaa kor u kac 15 dhibcood ah oo ah natiijada imtixaanka.

ACHIEVE TUTORING

“Achieve Tutoring” waxay bixisaa wax-baridda qofeysan ee ardaydu u-baahan tahay si ay u-gaaraan kaalinta ugu sarreeysa ee ay gaari karaan. Waxaannu arday walba u-diyarinaa barnaamij qofeysan, oo ku saleysan Manhajka Dawladda Massachusetts, si aanu ardayga u boodsiino hal darajo, marka aanu siinno wax-barid xoog leh. Waxaannu ku takhasusnay inaanu la shaqeynno ardayda oo dhan, oo ay ka mid yihiin ku leh naafanimada iyo hadda barta luqadda Ingiriisiga. Goolkayagu waa dardar-gelinta waxbarashada ardayda oo dhan, oo ay ka mid yihiin kuwa sigan, iyo kuwa oo niyadda haynin, iyo ka dhacay waxbarshada. Kulannada subaxnimada Sabtida waxa loo sameeyey ardayda ka dhacday waxbarashada - iyadoo laga caawinayo inay noqdaan bartayaal niyad leh oo gaara guul waxbarsho. Waxaannu bixinaa meerin (tutoring) guriga ah. Waxaannu kaloo bixinnaa wax-barid koox ah oo ka dhacda fasaladayada ku yaalla meesha dhexe ee 47 Winter Street, Boston (Downtown Crossing and Park Station). “Achieve Tutoring” waxay leedahay shaqaale khibrad leh oo ah barayaal ardayda dhigata fasalada K-12.

ALLIANCE FOR INCLUSION AND PREVENTION

“Alliance for Inclusion (AIP) and Prevention” wuxu iskaashiga la lahaa Dugsiyada Dadweynaha Boston 15-kii sano ee ugu dambeeyey sis are loogu qaado aflaxaada dugsiyeed kuna caawiya soo afjarida faraqa hanashada iyadoo la wadayo hawlo tacliimeed iyo kobcin tayo sare ee waqtiga dugsiga ka baxsan. Hay’ada AIP waxay kobcisaa hanashada ardayga iyadoo fool ka-fool ama kooxo tiro yar siisa umeerin xaga Akhriiga, Qorida iyo Xisaabta. Barnaamijka AIP ee “SES” wuxu ka socdaa labo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Boston: Dugsiga Dhexe Washington Irving iyo Lilla G. Frederick Dhexe Pilot.

AMERICA SCORES (New England)

America SCORES New England waxay isticmaalaan iskujiir u gaar ah ee kubada cagta, qorid, iscabir hal’abuurnimo, iyo barashada adeega si loogu baro Dugsiyada Dadweynaha Boston xirfadaha akhriis / qorida iyo xisaabta. Manhajyada cilmi barista ku dhisan ee “Awooda Gabayga” iyo “Qoraalka Bulshada” (“Power of Poetry” and “Writing for the Community”) oo bixiya qaoraalo hal’abuuran oo isudheeli tiran, duruus ku dhisan habka gabayada, qoraalka sharaxan, iyo cilmibaaris. Hay’ada SCORES waxay kale isticmaalaan barnaamijka Xissabta Dugsi Kadib ee “ETÁ/Cuisenaire” eek u lifaaqan cabirrada gobolka iyo maxalligaba. Hay’ada CORES waxay raadiyaan u adeegida ilmaaha dhamaantiis iyagoo siinayataageerid akhriis/qorid isudheelitiran, xisaab iyo dhismaha shaqsiga. Ardayda SCORES waxay tagaan barnaamijyo dugsi kadib ugu yaraan toban saac bishiiba sanad dugsiyeedka idil. Adeegyada waxa bixiya macalimiinta Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waalidiintu waxay helayaan warbixinada horukaca waqtiyo kala duwan shaqaalahayaguna waxay diyaar u yihiin inay la kulmaan oo la naaqisho horukaca ardayga.

ANN’S CHRISTIAN LEARNING CENTER

Hay’ada Ann’s Christian Learning Center (ACLC) waa xarun diin ku dhisan, oo bixisa umeerin fool ka-fool ah. Macalimiintayada aqoonta sare leh waxay u fidiyaan umeerinta ardayda fasalada 2-8. Ardayda waxa lagu dhiiri geliyaa iyadoo ka qaybgalka waalidka lala kaashanayo, in iyaguna ka qayb qaataan horumarinta himiloooyin waxbarasho la taaban karo, iyo dhiirringelinta aan fidino xaga barnaamijyada wacyigelinta. Waxan abaal marinaa ardayda haday si waxan uga soo baxaan imtixaanada aan ku qaadno maamulka Xaruntayada iyo dugsigooda, heerarka ay sare u kacaan, dhamaystirka saxsan ee shaqa guriga, iyao inay la yimaadaa niyad sami.

BELL-BUILDING EDUCATED LEADERS FOR LIFE

Qadiyada BELL (Building Educated Leaders for Life) waa kordhinta hanashooyinka waxbarasho iyo fursadaha nololeed ee caruurta ku nool bulshooyinka dakhliga hoose. Barnaamijka hay’ada BELL ee dugsi kadib waxay ugu fidiisaa Dugsiyada Dadweynaha Boston mucaawanada umeerin akhriis/qorid iyo shaqoguri gacan ku salaysan kooxo tiro yar Irsniinta ilaa Khamiista, iyo oo kale hawlaha dhaqameed, safarada banaanka iyo adeega mashruucyada bulshada maalmaha Jimcaha.

BOSTON LEARNING CENTER

Adaan wax lacag ah bixin, hay’ada “Boston Learning Center” waxan ugu fidin karnaa umeerin ilmahaaga dugsiga ama guriga ardayda fasalada ku jira K-12. Waxay kalee bixiyaan barnaamij niyadgelineed oo la dhaho BIFF dhalinyarada 6-12. Barnaamijka BIFF wuxu leeyahay gelitaanka kuliyadeed oo lagu qiyaasay in ka badan 90% ardayda ku jirta, wuxuna u bedelaa dhicitaanka libin tacliimeed. Labaatankii sanadood ee u dambeeyey, waxan u adeegnay 3,000 caruurta bulshadeena oo keenay natiijooyin heer sare ah. Barnaamijka ayaga waxa weheliya manhaj khaas ah oo loo hindisay inuu daboolo baahiyaha arday kasta.

BOSTON PUBLIC SCHOOLS

Barnaamijka Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) wuxu bixiyaa 60 saacadood oo waxbarid kooxo kooban xaga akhriska, qorida iyo xisaabta ay bixiyaan macalimiin aqoon heer sare leh oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Boston. Umeerinta waxa lagu qabtaa dugsiyada ka tirsan BPS ee loo tusmeeyey inay u qalmaan umeerinta SES waxana la dhigaa dugsi kahor ama kadib. Qalab gaar ah baa loo xulay si looga jawaabo baahiyaha waxbarasho ee ardayda u kala gaarka. Waalidku waxay la kulmaan macalimiinta sadex goor sanadkiiba si looga wada hadlo krokaca sunuga.

BRAIN FUSE ONE -TO-ONE TUTORING

Hay’ada Brainfuse, ardayda iyo macalimintu waxay iskula xiriiraan waqti dhab ah oo ku salaysan golfasalkayaga internetka ee sida sahlan loo isticmaalo. Hay’ada waxay laga heli karaa kombiyuutar kasta ee leh Brainfuse Internet-ka. Umeeriyaalkayagu waa macalimiin khibrad leh oo haysta shahaadooyin ku salaysan taxane tacliimeed oo adag, oy ku jiraan hubinta diburaaca aqoontooda, dibuwaraysiyo badan, tijaabooyin xirfadeed, iyo tababaro xoogan. Waxay bixiyaan umeerin xirfadeed ay bixiyaan macalimiin aqoon u leh barida xisaabta, akhriiga, iyo habka “ESL”-ka (Fasalada 4-12). Warbixinada horukaceed baa sii joogto ah loo sameeyaa (waxana lagu dhiibaa afka hooyo ee waalidka).

C&M EDUCATIONAL CONNECTIONS AND CONSULTING

“C & M Educational Connections and Consulting (CMECC)” waa hay’ad bixisa adeegyo meeris iyo taageero ah oo uu aasaasay sannadkii 2006 macalin hore ee Dugsiyada Dadweynaha Boston, kaas oo gartay baahida loo qabo barnaamij bacda-saaca ah (after school) oo ku salaysan cilmi-baaris oo loogu talagalay ardayda ku liidata xirfadaha wax-akhriska, qoraalka, iyo xisaabta. Qaabka

waxbarsho ee CMECC wuxuu taageeraa nidaamka ilmaha dhan ee waxbarasho oo wuxuu leeyahay xirfado uu kula shaqeyo arday kala duwan iyo goysaskooda. Waxaannu bixinnaa manhaj sannadeed ardayda siiya meerin (tutoring) xagga taageerada iyo xoojinta Wax-akhriska, Afka Ingiriiska, Higaadda, iyo Xisaabta ardayda Fasalada 1-6 si saaxiibtimo iyo hufnaan leh. Waxaannu bixinnaa kulanno gaar ah ee gurigaaga, iyo goobo komuyuunatiga ah, dugsiyada amase Xarunta, oo loo habeeyey inay kaafiyaan baahida ardaygaaga.

CATAPULT LEARNING

“Catapult Learning” waxay bixisaa meerin koox yar xagga Xisaabta amase Wax-akhriska. Barnaamijyadeennu waxay ardayda ka caawiyaan inay kasbadaan darajooyin fiican, yeeshaan isku kalsoonaan, oo ay kordhiyaan hankooda. Waxayaalaha ardayda laga filayo xagga dabeecadda iyo ka-qeybqaadashada waa cad yihiin oo waa joogto. Ardaydu waxay si xiiso leh ugu jeedaan casharka oo ay u sameynayaan hawlaha loogu tala-galay inay kor u qaaddaan waxbarashadooda. Macalimiintayada la tababaray waxay leeyihiin qaab shaqaale-tababaran ah “professional appearance” oo ku soo dhaweynaya, oo leh aragti saxa oo xiiso leh.

“Catapult Learning” waxay ardayda ku nool Boston siin doontaa:

- Macalimiin tababaran oo khibrad iyo dadaal leh
- Waxbarsho koox yar ah oo ugu badnaan ah 10 arday halkii macalin
- Laba kulan oo ah min 90 illaa 120 daqiiqo wiiggiiba
- Adeeg haboon oo la keeno dugsiyada ardayda
- Dugsiyada Bacda-saacaha ah “Afterschool”
- Imtixaan Ka-hor iyo Ka-dib ah
- Qorshayaal Waxbarasho oo Arday oo ku haboon baahida gaarka ah ee ardayda
- Waalid iyo Maamulayaal si joogta ah loo siiyo warbixinta horumarka ardaydu sameysay

CITIZEN SCHOOLS

Barnaamijka “Citizen Schools” ee dugsi kadib wuxu ku caawiyaa ardayda 1) dhismaha xirfadaha muhimka ah ee xisaabta iyo qorida, 2) horumarinta qiimayaalka mudnaanta leh iyo awoodaha hogaaminta, 3) u diyaarinta guusha gelitaanka dugsiyada sare iyo kuliyada, iyo 4) ka helitaanka khibrad shaqaalayaal iyo ku dayashada dadka aqoonta u leh noocyo shaqooyin kala duwan. Iyadoo hoos jooga hogaminta shaqaale xirfad yaqaano tababaran, ardaydu waxay “carbin” ka helaan nafhureyaal aqoon ku leh cilmiyo kala duwan, ay ku jiraan, arkitaktuurada, ganacsiga, joornaalnimada, sharciga, iyo teknolojiga. Ardaydu waxay ku tababartaa xirfado tacliimeed waxayna isku xiraan waxbarashada dugsiyada iyo guusha shaqo helida markay dhamaynayaan mashruucyada tababarka aduunka dhabta ah, sida diyaarinta iyo ka doodka maxkamad maleegan, qorida iyo nashiraada wargeys, dibuhindiska rugaha tareenada dhulka hoos mara, abuurka bogaga webka, iyo qaar kaloo badan. Shaqaalahayaga aqoonta lehi waxay kalee ku caawiyaan dhamaystirka shaqaguriga waxayna si joogto ah ula xiriiraan macalimiinta dugsiyada.

CLUB Z! IN-HOME TUTORING SERVICES

Adeegyada “Club Z! In-Home Tutoring Services” waxay bixisaa umeerin fool ka-fool khaas ah iyado ardaygu nabada gurigiisa joogo, waqtiyada u sahlan waalidka. Umeeriyaasha Club Z! waa macalimiin dugsiyada dadweynaha ama kuwa khaaska ah oo gobolka ruqsad ka haysta ama aqoonyahano jaamicadeed oo khibrad iyo umeerin u leh maadooyinka ay dhigaan. Club Z! waxay isku beegtaa umeeriyaasha iyo ardayda iyadoo ku salaysa baahiyaha tacliimeed iyo shaqsinimada qof kasta u khaaska ah. Hanaanka waxbarida umeeriyaashu waa kuwo aad ugu gaar ah oo loo afjaray khaas ahaanta arday kasta.

EDUCATE ONLINE

Hay’ada “Educate Online” waxay bixisaa umeerin guriga, shaqsi ahaan nool, waxana si sahlan lagu isticmaalaa qolfasalka internetka. Khibrada Educate Online waxay muraayad u tahay waxbarida iyadoo la wada fadhiyo isku qolka guriga hadana ardaydu waxay diyaar u yihiin furfurnaan iyo waxqabad iyadoo si shaqsi ah oo nabad leh qolfasalka online-ka. Ardaydu waxay kala soo baxaan barnaamijka BILAASH ahaan kombiyuutar ay siisay Educate Online. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay haystaan kombiyuutarka iyadoo dhamaynaya barnaamijka (sida heshiiyada degmada/fidiyuhu cadaynayaan). Waalidku iyagaa doorta kaltanka ilmahooda oo badaanaaba ay ku jiraan 2-4 xisadood oo min 60 miridh ah wiigiiba. Online wuxu ku haboon yahay ardayda badankooda ee fasalada 3-12. Barnaamijka Educate Online ee cilmi barista ku dhisan wuxu isticmaalaa waxbarid shaqsiyeed iyo tabaha waxabarashada lagu aflaxo si loo hagaajiyo xirfadaha akhriska iyo xisaabta ardayda.

GENERATIONS INCORPORATED

Hay’ada “Generations Incorporated” waxay siisaa umeerinta fool ka-fool ah ee akhriska/qorida ardayda fasalada K-4 ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waxan ka fidinaa adeegyada meelo badan ee degmada Magaaloweynta Boston. Sidaad wax dheeraad ah uga ogaatid hay’adan, booqo website-kayaga: www.generationsinc.org. Umeeriyaalku waxay la kulmaan fool ka-fool arday kasta laba ama sadex goor wiigii, ilaa 40 daqiiqo, iyadoo isticmaalaya manhajka la dhaho “Tababarida Akhriska” (Reading Coaches). Umeeriyaalku waa kuwo tabarsan laakin hada shaqada ka fariistay ee ka tirsan bulshada daneeyana akhris/qorida caruurta. Waxan ku cabirnaa natiijada barnaamijka “Tababarida Akhriska” anagoo isticmaalayna qaabka la dhaho “Basic Reading Inventory” (BRI), ee la maamulo sadex goor sanadkii. Ardayda ku jira barnaamijka ay waxay sii hagaajiyaan xirfadahooda akhris/qorida in ka badan laban-laab xaga inta laga filayey. Meelaha Adeegyada Umeerinta: Dugsiyada Ardayga, Xarunta Bulshada, ama Rugaha Dugsi Kadib (ay ku jiraan South Boston, Blue Hill, iyo Naadiyada Yawkey Wiilasha iyo Hablaha iyo Barnaamijka Dugsi Kadib ee St. Stephens)

GREENWOOD SHALOM OUTREACH COMMUNITY, INC.

“Greenwood Shalom Outreach Community (GSOC)” waa urur todoba sano soo jiray oo siiya dhalinyarada halista ku jira adeegyo kala duwan ee waxbarashada iyo taageerka. Barnaamijka “SES” ee GSOC wuxu fidiyaa umeerinta akhriyaha, Fananka Af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta iyadoo la kaashado caawinaada kombiyuutarka iyo waxbarida tooska ah ee fool ka-foolka ama kooxo yaryar. Hay’ada GSOC waxay aad ugu guulaysatay wanaajinta natiijooyinka tacliimeed ee ardayda halista ku jira, taasoo lagu qiyaasay qiimaynta la dhaho “Woodcock-Johnson kahor iyo kadib” iyo qiyaaso kaleba. Intii GSOC bilawday qiimaynta sanadkii 2003, ardayda idil ee GSOC wax umeerinnaysay waxay sare ugu kaceen ugu yaraan .5 heerar fasaleed mudo lix bilood kadib, qaarkoodna waxay sare ugu kaceen ilaa 3.5 heerar fasaleed.

LEARN-IT SYSTEMS

Hay’ada “Learn-It Systems” waxay u fidsaa kooxo kooban waxbarida dugsi kadib, oy bixiyaan macalimiin tababar heer sare ah, oo ka ansaxsan gobolka oo ugu yaraan leh khibrad wax kadhigid dugsi mudo 2 sano ah. Ardayda ku jira barnaamijkan waxa marka hore laysku daraa intii isku heer fasal ah xaga maamulka kowaad ee lagu qiimaynayo qaab gaar ahaan loo sameeyey inuu shaabaha qiimaynta gobolka Massachusetts. Natiijooyinka qiimaynta kowaad waxay saldhig u tahay qorshaha waxbarida khaaska u noqonaya arday kastaba. Ardayda isku mid noqoto baahidooda waxbaridu baa markaas laysku daraa iyadoo loo qaybinayo bulshooyin waxbarasho oo tiro yaryar (kooxo) si loo siiyo fursada kobcinta ugu saraysa, isku faca wax wada baranaya, iyo kooxo leh isku manhaj iyo hawlgelin. Barnaamijyada “Learn-It Systems” waxay leeyihiin natiijooyin. Hay’ada “Learn-It” waxay caawisay kumaankun arday oo wadanka ku baahsan iyadoo bartay xirfadaha wax akhriska asaliga ah iyo xisaabta ay u baahan yihiin siday ugu aflaxaan dugsiyada iyo noloshaba.

PINNACLE LEARNING CENTER

Xarunta "Pinnacle Learning Center" waa mid magaalada laga leeyahay oo laga maamulo, fidisana adeegyada fool ka-foolka umeerinta ee akhriya, qorida, iyo xisaabta. Barnaamijka Pinnacle Learning Center waxa loo hindisay inuu ardayda ku caawiyo hanashada oo ka sii kordhiyo cabirada waxbarashada Massachusetts. Macalimiintayada khibrada sare leh, ee haysta shahaadadaha "MA" waxa loo carbiyey isticmaalka qalabka casriga ugu dambeeya iyo tabaha waxbarida si ay ugu caawiyaan ardayda hanashada barbarin. Barnaamijkayaga waxa ku jira latalinta hore ee waalidka/koriyaha, imtixaanka baadhista, xiriirka xoogan eel ala leeyahay macalimiinta qolfasalada iyo manhaj shakhsiyeedka loo hindisay in sida ugu koraysa loo qaado kartida ardayga. Macalimiintayadu waxay ogyihiin sida haboon ee loo dhiirigelin karo ilmahaaga siduu ugu aflaxo dugsiga iyo wixi ka dambeeya!

PREFERRED TUTORING SERVICES

"Preferred Tutoring Services, LLC" waxay bixisaa adeegyo SES ah oo heer sare ah ardayda ku jirta fasalada K illaa 8 oo koox yar ah. "Preferred Tutoring Services" waxay sameysay tallaabooyin horumariyey wax qabadka ardayda dib uga dhacay Luqadda, Arkhriska iyo Xisaabta. Tirada ardayda ku jirta kooxahayaga kama badato shan. Marka aanu qaadno imtixaanka baarista ah, waxaannu sameynaa kooxo isku heer ah oo leh baahiyo waxbarsho oo isku mid ah. Kooxda yari waxay macalinka siisaa fursad uu xoogga ku saaro baahida arday walba.

SMARTIES TUTORING SERVICES

"Smarties Tutoring Services" waxay in ka badan 2500 oo arday ka caawisay Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta iyadoo isticmaaleysa barnaamij ka kooban u-meerinta kooxo yar-yar oo feejigan, u-meerin shakhsi ah, manhaj firfircoon oo "online" ah. Barnaamijkayaga waa mid aad loogu guuleystay. Shantii ardayba afar ayaa kor u-qaada boondadooda imtixaanka in ka badan boqolkiiba 10%, in ka badan nus ayaa kor u-kacay boqolkiiba 25%. Barnaamijyadayadu waxay kolmaan 2 illaa 4 maalmood/wiiggii muddo dhan for 1.5 illaa 2 saac. Fasalladayada waxa bara macalimiin khibrad leh oo ku faraxsan inay caawiyaan ilmaha inay ku ficnaadaan xirfadahooda xisaabta iyo akhriiska iyo qoridda. Waxaannu qaadanaa fursad kasta oo aannu ku dhiirigalin karno ardayda inay si buuxda uga faa'ideystaan kartida ay leeyihiin. "Smarties" waxay aqoonsan tahay in ilma kastaa uu yahay gaar, oo waxaannu ku dadaalnaa inay buuxinno baahida gaarka ah ee mid walba oo ka mid ah ardaydayada. Waxaannu beernaa in la guuleysto annagoo ilmaha ka fileynna inay qabtaan shaqo culus, anagoo taageereyna ardayda inay fuliyaan waxyaalaha aannu ka fileynno.

SYLVAN LEARNING CENTER

Dariiqadda ay "Sylvan Learning" u-marto inay horumariso guulaha waxbarashadu waxay ku saleysan tahay qaaddida imtixaanka hore oo aqoonsada meelaha xoogga leh iyo meelaha tabarta daran ee xirfadaha ardayga. Iyadoo lagu saleynaya baahida ardayga, ayaa waxa la diyaariyaa qorshe gaar ah oo isticmaalaya barid shakhsiyeyn iyo dhiirigali ardayeed, taas oo suurta-galisa caawimo waxbarasho oo ku jeeda waxyaalaha ay ardaydu u-baahan yihiin. Annagoo isticmaaleynna manhajka iyo tabaha Waxbarshada ee "Sylvan", ayaa macalimiintayada tababaran ee la-aqoonsan yahay arday walba ku haggaa qorshihiiisa gaarka ah ee shakhsiyeyn. Inta uu barnaamijku socdo, waxay waalidku helaan warar ku saabsan horumarka uu sameeyey ilmahoodu. "Sylvan Learning" waxay kaloo u-aragtaa in arday walba macalinkiisa dugsiga iyo maamulkiisa degmadu ay yihiin kuwo muhim ah oo ay tahay in lala shaqeeyo xagga baroosaska waxbarshada oo lala sameeyo is-gaarsiin amase xiriir wacan.

"Sylvan Learning" waa hogaamiye qaran ee bixinta adeegyada waxbarshada kaabka ah oo barnaamijyadayadu waxay dhalinayeen natiijooyin wacan in ka badan 30 sano.

TENACITY, INC.

"Tenacity" waa urur guul ka dhaliyey horumarinta dhalinyarada Boston oo raadinaya "hagaajinta horumarinta tacliinta, qof ahaanta, iyo jir dhiska dhalinyarada magaalada iyadoo laysugu darayo taageer tacliimeed iyo wabarida/tartanka teniska ee xooga saaraya xirfadaha nololeed". Barnaamijka Tenacity ee la dhaho "After-School Excellence Program (ASEP)" wuxu si iskaashi buuxda ula shaqeeyaa sidad dugsiga ee Dugsiyada Dadweynaha Boston siduu ugu fidiyo ardayda dugsiga dhexe ee "halista ku jira" barnaamij xoog leh ee sadex sanadood ah. Barnaamijka ASEP wuxu isku daraa horumarinta taageerka akhriya/akhri-qorida, xirfadaha nololeed iyo hawlaha jirdhiska/teniska oo lagu qabanayo jawi habaysan. Ardayda barnaamijka ASEP waxay tagaan sadex goor galabti wiig kasta mudo 30 wiig ah, markay ku jiraan sanad dugsiyada fasalada lixaad, todobaad, iyo sideedaad, oo iskujir dhan 290 saacadood sanad dugsiyeed kasta, iyo 90 saacadood xiliga kulaylaha.

THE ACHIEVEMENT ACADEMY

"The Achievement Academy" waxay bixisaa meerin fool-ka-fool ah oo ay siisaa ardayda oo ka kooban kooxo yar yar waxay xoogga saartaa dabacsanaanta waxbarsho ee arday walba si loo hubiyo inay helayaan waxbarid meelihii looga baahnaa. Macalimiintu waxay si toos ah ula shaqeeyaan ilmahaaga oo waxay adiga kaala xiriiraan horumarka uu ilmahaagu ka sameeyey barnaamijka. Imtixaanada hore iyo kuwa dembe ee aannu qaadnaa waxay raadraacaan horumarka uu sameeyey arday walba inta uu ku jiray barnaamijka. Waxa kale oo aannu isticmaalnaa booqashooyin dibadeed iyo dad kale oo la hadla ardayda si loo sameeyo xiriir ka dhaxeeya xirfadaha ay baranayaan iyo noloshooda dhabta ah. Macalimiintayada naxariista leh ee sida sare loo tababaray waxa ka go'an inay kor u-qaadaan boondooyinka iyo kalsoonida ilmahaaga.

THE YMCA OF GREATER BOSTON

Barnaamijyada SES ee "The YMCA of Greater Boston" waxay bixiyaan meerin ah xagga Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta. Waxyaalaha ka soo baxa waxa ka mid ah xirfado ay ka mid yihiin akhriya wacan, fahan wacan, qoraal wacan, iyo erayo kordhin. Xagga xisaabta, ardaydu waxay sare u-qaadan xirfadahooda la xiriira "operations", "patterns", jajabka "fractions", and mushkiladaha "word problems". Waxbarshadu waxay ku saleysan tahay horumar shakhsiyadeed ee arday walba iyo qorshihiiisa gaarka ah iyo goolasha ku cad qorshahiisa.

Marka la heli karo, macalimiin dugsiga ayaa ah meeriyayaal SES ee "YMCA"ga. Shaqadoodii hore iyo aqoontooda iyo khibradooda ayaa ah tayo ku haboon horumarka ardayda ku qoran barnaamijka. Arday ka kooban lix illaa toban arday ayaa meelo shucuuri ka muuqato wax ku wada barta. Dhallinyaradu waxay ku hawlan tahay hawlada gacmeed kor u-qaada kalsoonida iyagoo sare u qaadaya xirfadaha fahamka. Hawlahaas waxa ka mid ah "Read-alouds", "writing prompts", xisaab ku saleysan nolosha dhabta ah ("real-life" math), iyo mushkilado adag (challenging "problems"), oo arday ku toosiya waxbarashadooda.

(Wac xiriirada si aad u samaysato balamo umeerin iyo tafaasiisha adeega maalmaha iyo saacadaha)

Wixi xog dheeraad ah ee umeeriyaalka waxa laga heli karaa Waaxda Waxbarashada Massachusetts website-keeda:
<http://www.doe.mass.edu/ses/>

Su'aalo & Jawaabo Xaga "SES" Umeerinta Bilaashka

Waa maxay barnaamijka umeerinta bilaashka ah ee "SES"?
Adeegyada Taageerka Waxbarashadu (Supplemental Education Services -SES) waa barnaamij dawlada fedraaligu maal geliso oo qayb ka ah sharciga Ilmana Dib Loogama Tegayo (No Child Left Behind -NCLB) ee siiya umeerin bilaash ah ardayda u qalma cunto bilaash ah ama qiimo jaban ee dugsiyada qaarkood. Umeerinta waxa la siiyaa ardayda u qalma waqti ka baxsan maalin dugsiyeedka caadiga ah waxana bixiya fidiyeyaal kala duwan. Barnaamijyada waxa waxa loo habeeyey si loo caawiyo hagaajinta xirfadaha ardayda xaga akhriska, qorida iyo xisaabta.

Sidee ku ogaanayaa inaan u qalmo umeerinta SES?

Waad u qalantaa, hadii:

1. Ilmahaagu ku jiro dugsiyada dadweynaha Massachusetts ee loo magacaabay inay u qalmaan umeerinta SES, ee ku salaysan natiijooyinka kartiyeed; IYO
2. Ilmahaagu u qalmo cunto bilaash ah ama qiimo jaban; IYO
3. Ilmahaagu ku soo celiyey arjiga codsiga cuntada bilaashka ah ama qiimaha dugsigiisa ama dugsigeeda.

Qoysaska daboolada sadexdaas shuruudood waxay u qalmaan inay is qoraan umeerinta SES. Fadlan ogow in maadaam lacagtu kooban tahay, ardayda u qalma idili ma helayaan umeerinta SES.

Waqtigee iyo meeshee iska qori karaan barnaamijka umeerinta SES?

Arjiyada diiwaangelinta waxa laga helayaa dugsiga ilmahaaga iyo meelo kale ee Boston ku baahsan mudada isqorida (Sebtembar 7 – Oktoobar 8, 2010), ay ku jiraan:

Aaga Bari ee "Family Resource Center F.R.C."
Campbell Resource Center
1216 Dorchester Avenue
Dorchester, MA 02124
617-635-8015
Isniin - Jimce: 8:30 AM - 5 PM

Aaga Galbeed ee "F.R.C."
Barron Building
515 Hyde Park Avenue
Roslindale, MA 02131
617-635-7719
Isniin - Jimce: 8:30 AM - 5 PM

Xarunta "Family & Student Engagement Training"
443 Warren Street
Dorchester, MA 02124
617-635-7750
Isniin & Arbaca: 8:30 AM- 7:30 PM
Salaasa, Thur & Jimce: 8:30 AM - 1:30 PM

Laanta "East Boston Satellite F.R.C."
Umana Middle School Academy
312 Border Street
617-635-9597
East Boston, MA 02128
Khamiis, 8:30 AM – 5 PM

Aaga Waqooyi ee "F.R.C."
Madison Park Complex
55 Malcolm X Boulevard
Roxbury, MA 02118
617-635-9010
Isniin - Jimce: 8:30 AM – 5 PM

"Allston/Brighton Satellite F.R.C."
Jackson/Mann K-8
40 Armington Street
Allston, MA 02134
617-635-8532, ext. 222
Salaasa: 8:30 AM – 5:00 PM

Yaa bixinaya umeerinta SES ee bilaashka ah?

Xiliga diiwaangelinta socoto, qoysaska u qalma baa ka xulanaya liiska Fidiyeyaal (providers) Gobolku ansixiyey. Fidiyeyaalku waxay bixiyaan adeegyada umeerinta ee maadooyin kala duwan oo siiyaan ardayda heerarka fasalada kala duwan. Wixi tafaasiil ah ka fiiri liiska fidiyeyaal. Fadlan ogow in adeegyada umeerinta in laga sameeyo dugsiga ilmahaaga ama meel kale.

Waa maxay su'aalaha aan ku tashanayaa markaan xulanayo fidiyaha barnaamijka umeerinta?

- Waa maxay qaybta maadada baahida tacliimeed ee ilmahaaga (xisaab, akhris, iyo/ama qorid)?
- Maalmahee baa wiigii barnaamijka la bixiyaa?
- Waqtigee baa barnaamijka la bilaabaa oo la xidhaa maalin kasta?
- Waqtigee baa barnaamijka la bilaabaa dayrtii? Waqtigee baa barnaamijku dhamaanayaa gu'ga soo socda?
- Ma heli doonaa ilmahaagu waxbarid fool-ka-fool ah amase lagu dari koox kooban ee waxbarasho?
- Qofkee baa wax baraya ilmahaaga? Waa maxay aqonta macalimiintu?
- Meeshee baa adeegyada lagu bixinayaa? Sidee baa ilmahaagu u tegayaa meesha? (Xusuusnow, lama bixinayo gaadiid.)
- Sidee baa fidiyuhu u daboolayaa baahiyaha ardayda naafada ah ama ardayda aan afkooda hooyo ahayn Ingiriisiga?
- Ma u baahnahay gelitaanka Internetka sidaan u helo adeegyadan?

Ma ka qayb geli karaa ilmahaagu hal barnaamij wax ka badan?

Ardayda waxa laga filayaa inay ka bilaabaan oo ku dhameeyaan barnaamijka umeerinta isla hal fidiye. Waa muhim inaad si feejigan u xulato fidiyaha sidaan u daboolo baahiyaha qoyskaaga. Hasa ahaatee, hadii barnaamijka aad dooratay uu dabooli waayo waxad filanaysey, waxa jiri doona fursad aad ku bedelato barnaamijyada waqti sadex wiig gudahood ah bisha Janaayo. Janaayo kadib, lama ogolaanayo wax isbedel ah.

Hadii ilmahaagu u baahan yahay caawinaad xaga xisaabta iyo akhriska labadaba, ma dooran karaa hal fidiye ee xisaabedd iyo mid akhriska ah?

Maya, ilmahaagu wuxu heli karaa oo keliya hal fidiye ee umeerinta SES. Markan oo kale, waxa wacan inaad doorato fidiye umeerin kara xisaabta iyo akhriskaba.

Waa maxay shuruudaha xaadiraadu ee barnaamijyada umeerinta SES?

Arday kasta ee la qoray barnaamij umeerineed waa inuu ka xaadiraad deris kasta. Arday ka maqnaada shan deris oo isku xiga waa laga saarayaa barnaamijka.

Yaan wici karaa hadaan su'aalo dheeraad ah qabo?

- La xiriir miduun fidiyeyaalka adeega ee ku jira liiska Hagaha Diburaaca Degdega ah (Quick Reference Guide) xaga wixi warar dheeraad ah.
- Wixi su'aalo guud ah ee ku saabsan barnaamijka umeerinta bilaashka ah ee SES, fadlan wac Steve Desrosiers ee Xafiiska Mas'uulnimada BPS (Office of Accountability), 617-635-6810.
- Booqo "website"-ka BPS: www.bostonpublicschools.org, oo riix "Resources → For Families"
- Booqo "website"-ka Waaxda Massachusetts ee Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare: www.doe.mass.edu/ses/

